Hadaad doonayso turjubaan,
fadlan inoo sheeg.

Qoraalkan waxaad ku heli kartaa inaad ku codsato qaabab ama luuqado kale.

## Gargaarka Sharciga ee Vermont

**1.800.889.2047**


264 N. Winooski Ave.
Burlington VT 05401
Fax: 802.863.7152

57 North Main St., Suite 2
Rutland VT 05701
Fax: 802.775.0022

7 Court St.
Montpelier VT 05601
Fax: 802.223.1621

56 Main St., Suite 301
Springfield VT 05156
Fax: 802.885.5754

177 Western Ave., Suite 1
St. Johnsbury VT 05819
Fax: 802.748.4610


Vermont Legal Aid
Working for Justice

**Barnaamijka Caawinta Macmiilka (CAP)**
Barnaamij kamid ah Gargaarka Sharciga ee Vermont


TE: 1.800.889.2047
Email: screening@vtlegalaid.org
www.vtlawhelp.org/client-assistance-program


## Maku Akhrisaa Luuqad kale?

هذا الكتيب متوافر باللغة العربية. اتصلوا بنا أو زوروا موقع www.vtlawhelp.org/CAP-brochures للحصول على الكتيب باللغة العربية

ဤလက်ကမ်းစာရွက်ကို မြန်မာဘာသာဖြင့် ရရှိနိုင်ပါသည်။
ကျွန်ုပ်တို့ကို ဖုန်းဆက်၍ဖြစ်စေ၊
www.vtlawhelp.org/CAP- brochures ကို ဝင်ကြည့်၍ဖြစ်စေ
မြန်မာဘာသာဖြင့် လက်ကမ်းစာရွက်ကို ရရှိနိုင်ပါသည်။

Cette brochure est disponible en français. Appelez-nous ou rendez-vous sur www.vtlawhelp.org/CAP-brochures pour obtenir la brochure en français.

Uru rukaratasi ruboneka mu Kirundi. Ca utwakura canke uje kuri www.vtlawhelp.org/CAP- brochures kugira ururonke mu Kirundi.

यो पुस्तिका नेपालीमा उपलब्ध छ। नेपाली मा पुस्तिका प्राप्त गर्न  हामीलाई फोन गर्नुहोस् वा www.vtlawhelp.org/CAP-brochures

Qoraalkan waxaa laguugu diyaariyay Af-Somali. Naga soo wac ama guji www.vtlawhelp.org/CAP-brochures si aad qoraalkan ugu daalacato Af-Somali.

Este folleto está disponible en español. Llámenos o vaya a www.vtlawhelp.org/CAP-brochures para obtener el folleto en español.

This brochure is available in English. Call us or go to www.vtlawhelp.org/CAP-brochures to get the brochure in English.



Gargaarka Sharciga ee Vermont

## Mashruuca Sharciga Naafada

# Barnaamijka Caawinta Macmiilka (CAP)







Caawimaad qarsoodi ah, bilaash ah, ee quseeya dhibaatooyinka codsiga ama helitanka xirfadeed ama adeeg noolaleed oo madax-bannaan

**1.800.889.2047**

## Maxaa Nahay?



Barnaamijka Caawinta Macmiilka (CAP) wuxuu u doodayaa ama difaacayaa xuquuqda shaqsiyaadka curyaamada ah kuwaasoo codsado ama helo adeega baxnaaninta quseeya shaqooyinka ay qabtaan hay'adaha ama barnaamijyada laga maalgeliyo Xeerka Baxnaaninta:

- Waaxda Baxnaaninta Xirfadeed
- Xarunta Vermont ee Noolasha Madaxa-bannaan
- Waaxda Indhoolayaasha iyo Arag Yarida
- Ururka Vermont ee Indhoolayaasha iyo Dadka Araga yar
- Ururka Vermont ee Ganacsiga, Warshadaha iyo Baxnaaninta
- Taageerada Shaqaaleynta
- Adeegyada kumeelgaarka ee Dugsiga-ilaa-Shaqada

*CAP waa barnaamij ay maalgaliso dowlada dhexe.*

**Xeerka Baxnaaninta**

**Golaha Sharci Dejinta waxay meel-mariyeen Xeerka Baxnaaninta si loo caawiyo dadka naafada ah ayna u helaan shaqooyin wanaagsan si ay u noqdaan kuwo madax-bannaan, isku filan, kana mid ah bulshadooda. Golaha Sharci Dejinta waxay sidoo kale maalgeliyeen Barnaamijyada Caawinta Macmiilka si ay uga caawiyaan dadka inay helaan adeega baxnaaninta quseeya shaqooy-inka ay rabaan.**

# Ma doonaysaa Caawimaad?

## Ka wac Barnaamijka Caawinta Macmiilka

**1.800.889.2047**

## Waxa Aan Sameyno

CAP waxay caawisaa shaqsiyaadka fahamsan xuquuqdooda kuwaasoo helaan adeegyada. Waxaan:

- *Kugu wargelinaynaa adeegyada iyo faa'idooyinka aad ka heli karto Xeerka Baxnaaninta iyo Xuquuq I ee Xeerka Naafada ee Maraykanka*
- *Kuu sharaxaynaa sida aad ku heli laheyd adeegyadan*
- *Baaraynaa su'aalahaada iyo caba shooyinkaaga*
- *Kaa caawinaynaa xalinta dhibaa tooyinka aad ku qabto la-taliyahaa ga ama hay'ada iyo go'aanada racfaan*
- *Kuu doodaynaa si aad u hesho adeega aad u baahantahay*

Waxaan la tacaaleeynaa dhibaatooy-inka nidaamka guud kaasoo adiga iyo dadka kale idin kaga dhiga mid adag inaad heshaan adeeg. Waxaana kala talinaa hay'adaha wax ka beddelka siyaasadaha iyo hababka keeni kara adeeg fiican.

## Sida aan Kuu Caawin Karno

Wac Barnaamijka Caawinta Macamilka hadii:

- *Ku qabto dhibaato hay'adaha aadna u baahantahay macluumaad ama caawimaad*
- *Lagaa horjoogsaday adeega baxnaaninta*
- *Aad u malayso in nidaamka wakhti dheer qaadanayo*
- *Aad dhibaato ku qabto la-taliyahaaga*
- *Aad heleynin adeega aad u baahantahay*
- *La xiray kiiskaaga ogolaansho la'aantaada*
- *Aad tahay arday naafo ah aadna heleynin adeega kumeel-gaarka kahor-shaqada kaasoo kaa caawin doona inaad ugu diyaar-garoowdo si guul ah u gudbida waxbarashada sarre, tababar xirfadeed ama goob shaqo*



**Macluumaad walbo aad siiso CAP waa mid khaas ah. Kaliya waxaan macluumaadkaaga la wadaagi karnaa hadii aad qoraal ahaan inoogu sheegto. Kuu lama xiriirayno hay'adaha ogolaansho la'aantaada.**